



Diiradda la saarayo: Sanduuqyada dhaqaale ee adeegyada la xiriira caafimaadka

CareOregon waxay rabtaa in ay xaqiijiso in baahiyahaaga gaarka ah wax laga qabto, sidii aad inta suuragal ah u noqoto qof caafimaad qaba. Taasi waa sababta faa'iidooyinkaaga ay ugu jiraan helitaanka sanduuq dhaqaale loogu talagalay waxa Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) ugu yeero "adeegyada la xiriira caafimaadka."

Sanduuqan dhaqaale wuxuu daboolaa waxyaabaha ama adeegyada ku caawin doona ee kaa dhigi qof caafimaad qaba, ee ay dhic karto in aadan filaynin in uu lacagtiisa bixin doono qorshahaaga caafimaadku.

Tusaalooyinka nolosha dhabta ah

Sanduuqyada dhaqaale ee adeegyada la xiriira caafimaadka waxay kaa caawiyaan in aad hesho oo ku sugnaato caafimaad. Halkan waxaa ku qoran tusaalooyinka qaarkood:



Balamaha dhanka telefoonka/fiidiyowga: Telefoonka gacanta, tablet, isku xirka internet-ka oo loogu talagalay helitaan wanaagsan ee ku aadan bixiyayaasha, iwm.



Taageerada cuntada: Isku keenista cuntada, foojarada cuntada, sanduuqyada suuqa beeraleyda, iwm.



Taageerada guryaha: Alaabta guriga, lacagaha codsiga ee loogu talagalay guryaha ama Aqoonsiga gobolku bixiyo, kharashyada guuritaanka, iwm.



Jawiga nololeed: Qaboojiyayaasha hawada, kabaha ciyaaraha, waxyaabaha wanaajiya dhaqdhaqaaqa, iwm.



Waxyaabaha raaxada: Bustayaal culus/miisaan leh, qalabka caawimaada hurdada, foojaro loogu talagalay fasallada yoga, iwm.

Dhaqaalahani waxaa loogu tala galay in lagu buuxiyo baahiyaha ilaa laga helayo qorshe joogto ah.

Tallaabooyinka loogu talagalay codsiga sanduuqa dhaqaale

1

Daryeel bixiyahaaga ama isku duwahaaga daryeelka kala hadal waxa hortaagan in aad hesho oo ku sugnaato caafimaad. Xubnaha ka tirsan kooxda daryeelka ayaa sameyn kara codsiyo loogu talagalay sanduuqyada dhaqaale ee adeegyada la xiriira caafimaadka.

2

Haddii ogaanshahaaga xanuun jira ama daaweyntaadu dalbato shay ama adeeg aanan haddii kale ku jirin caymiskaaga caafimaadka, waxay buuxin doonaan foom ku jira website-kayaga si ay u sameeyaan codsiga.

3

Waxaan la socod siinaa doonaa adiga iyo qofka codsiga sameeyey haddii codsigaaga la oggolaado.

Su'aalaha?

Haddii aad hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan adeegyada la xiriira caafimaadka ama mawduucyo kale, Adeega Macmiilka ee CareOregon ka wac **800-224-4840** ama **TTY 711** ama farriin ammaan ah noogu soo dir careoregon.org/portal

careoregon.org



Codsiyada maalgelinta adeegyada la xiriira caafimaadka waxaa hawshiisa qabata CareOregon, qorshahaaga caafimaadka Medicaid. Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh haqijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).

Oregon
Health
Authority

Health Share of Oregon (HSO) waa waxa loo yaqaano daryeelka ururadu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.

health
share
Health Share of Oregon

CareOregon waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya n ay bixiso daryeel. Waxaanu sidoo kale gacan ka geysanaa codsiyada maalgelined ee adeegyada la xiriira caafimaadka.

CareOregon

Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP) wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliso sare, kalkaaliyaha dhakhtarta ama daaweynta bedelka ah 'naturopath'. Waxay isku duwaan daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakhaatiirta ilkaha, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda, farmashiyayaasha iyo kuwo kale.



CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):

- ▶ Daryeelka caafimaadka jirka
- ▶ Daryeelka caafimaadka dhimirka
- ▶ Isticmaalka mukhaadaraadka
- ▶ Daryeelka ilkaha
- ▶ Medicare la sii marayo CareOregon Advantage
- ▶ Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:

- ▶ Isku duwida daryeelka
- ▶ Farmashiyaha
- ▶ Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- ▶ Kala doorashada gaadiidka
- ▶ Adeegyada turjumaada luqadda
- ▶ ER iyo daryeelka degdega ah

Su'aalaha?

Ma jeclaan lahayd in aad waxyaabo badan ogaato? **Kooxdeena Adeega Macmiilka** ee waxtarka iyo saaxiibtinimada leh ka wac **800-224-4840** ama farriin ammaan ah noogu soo dir careoregon.org/portal

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa lacag la'aan ah. Wac 800-224-4840 ama TTY 711.

health
share
Health Share of Oregon

CareOregon®